JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| Sannadkii 11aad | Cadad Gaar ah | Tariikhda Daabacada 05/10/2022 |
|---|---|---|

## FAAFINTA RASMIGA AH EE SADDEX BILOOD-LAHA AH JULY TO SEPTEMBER

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com

Sannadka 2022

Lama iibin karo
Not for sale

## TUSMADA CADADKA


| | |
|---|---|
| **QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANI YADDA QARANKA:** | |
| 1. **SOOMA BIXIN** | |
| **QAYBTA LABAAD: XEER MADAXWEYNE:** | |
| 2. **Xeer Madaxweyne** Ogolaanshaha Deganaanshaha Rasmiga ah | 2 |
| | 10 |
| 3. **Wareegto Madaxweyne** Cafis | 11 |
| 4. **Wareegto Madaxweyne** Cafis | 12 |
| 5. **Wareegto Madaxweyne** Magacaabid | 13 |
| 6. **Wareegto Madaxweyne** Magacaabid | 14 |
| 7. **Wareegto Madaxweyne** Magacaabid | 15 |
| 8. **Wareegto Madaxweyne** Magacaabid | 16 |
| 9. **Wareegto Madaxweyne** Magacaabid | 17 |
| 10. **Wareegto Madaxweyne** Magacaabid | 18 |
| 11. **Wareegto Madaxweyne** Magacaabid | 19 |
| 12. **Wareegto Madaxweyne** Magacaabid | 20 |
| 13. **Wareegto Madaxweyne** Magacaabid | 21 |
| **QAYBTA SADEXAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIIJOOYINKA DOORASHOOYINKA & BARNAAMIJYADA DAWLADA:** | |
| 14. **SOOMA BIXIN** | |
| **QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:** | |
| 15. **SOOMA BIXIN** | |
| **QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:** | |
| 16. **SOOMA BIXIN** | |

## QAYBTA LABAAD:

### XEER MADAXWEYNE:

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

---

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249-917/082022 Taar: 06/08/2022

## Xeer Madaxweyne Lr.17/082022
## Ogolaanshaha Deganaaanshaha Rasmiga ah

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 8aad, Farqadiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo dhigaya in Ajaanibka Dalka sifo Sharcia ah ku jooga in uu xeerka hortiisa ku leeyahay xuquuq iyo waajibaad la siman tan muwaadiniinta, oo ay ka reebban tahay xuquuqda siyaasiga ah ee muwaadiniinta u gaarka ah;

Markaan Arkay: Qodobka 5aad iyo qodobka 11aad ee Xeerka Socdaalka; Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr. 72/1995;

**Markaan Tix-geliyay:** Muhiimadda ay leedahay in la helo aqoonsi ay yeeshaan dadka ajaanibka ah ee raba in ay dalka si rasmi u degaan, aqoonsigaasi oo u fududaynaya Xuquuqdooda iyo Waajibaadka ku xusan Qodobka 8aad ee Dastuurka;

<u>**Waxaan Go'aamiyey;**</u>

## Qodobka 1aad

## Deganaashaha rasmiga (permanent residence)

1) Qof kasta oo ajaanibka ah ee aan u dhalan Jamhuuriyadda Somaliland ee raba inuu si rasmi u dego uguna noolaado Dalka Somaliland, waxa la siinayaa Ogolaanshaha Deganaansho Rasmi ah (permanent Residence).
2) Qofka Ajaanibka ah waxa looga jeedaa qof kasta oo aan u dhalan Dalka Somaliland, kana tafiirmin dadkii deganaa dalka Somaliland 26-kii bishii lixaaad ee sanadkii 1960-kii iyo ka-hor, sida uu dhigayo Qodobka 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.
3) Ogolaanshaha deganaanshaha rasmiga ah waxa lagu siinayaa hab aqoonsi ah (permanent Residence ID) sida uu dhigayo Qodobka 5aad Farqadiisa 2aad ee Xeerka Socdaalka Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr.72/1995.

## Qodobka 2aad

## Cidda u Qalanta Deganaanshaha Rasmiga ah

Ogolaanshaha Deganaanshaha Rasmiga ah waxa la siinayaa;

1. Qofka Ajaanibka ah ee markii uu xeerka socdaalku dhaqan-galay degganaa dhulka Somaliland muddo shan sano (5 sano) ah sida uu dhigayo Qodobka 44aad ee Xeerka Socdaalku.

2. Qofka Ajaanibka ah ee dalka ku leh hanti ma-guurta ah oo Qiimaheedu dhanyahay ugu yaraan $150,000 (boqol iyo kontonkun oo dollar) ama haysta shahaadadda maal-gashiga, si waafaqsan Qodobka $26^{aad}$ ee Xeerka Maalgashiga, Xeer Lr.99/2021

3. Qofka Ajaanibka ah ee haysta deganaansho ku meel gaadhka ah (Temporary Residence) muddo shan sanno (5 sanno) ah hadii uu leeyahay xirfad aqoon ama dalka looga baahanyahay.

4. Deganaanshaha rasmiga ah waxa kale oo la siin karaa qofka deganaanshaha la siiyey xaaskiisa ama ninkeeda iyo sidoo kale caruurtooda ka yar 18 jir sida ku cad Qodobbada $11^{aad}$ iyo $12^{aad}$ ee Xeerka Socdaalka.

## Qodobka $3^{aad}$

## Shuruudaha Deganaanshaha Rasmiga ah

Qofka ajaanibka ah ee raba in la siiyo deganaanshaha;

1. waa in uu dalka sifo sharci ah ku soo galay, isla markaana haystaa Baasaaboor ansax ah ama Ogolaansho ansax ah ee soo gelidda iyo joogitaanka dhulka Somaliland si waafaqsan Qodobka 4aad ee Xeerka Socdaalka Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr. 72/1995

2. waa in uu deggannaa ama ku noolaa dalka ugu yaraan shan sanno (5 sanno) sida ku cad Qodobbada 11aad iyo 44aad ee xeerka Socdaalka.

3. waa in uu soo codsado ogolaanshaha deganaanshaha rasmiga ah.

## Qodobka 4aad

## Muddada Deganaanshaha Rasmiga

Muddada ogolaanshaha deganaanshaha rasmiga ahi waa shann sano (5 sanno) oo ka bilaabmaysa maalintii la siiyo kaadhka deganaanshaha rasmiga ah, waxana loo cusboonaysiinayaa bil ka hor dhammaadka muddada degaanshaha.

## Qodobka 5aad

## Xuquuqda Qofka la-siiyo Deganaanshaha Rasmiga ah

Qofka Ajaanibka ah ee la siiyo deganaanshaha rasmiga waxa uu xaq u yeelanayaa;

1. In uu dego oo uu ku noolaado dalka meel kasta oo uu doono.
2. In uu ka shaqaystan karo ama laga shaqaaleeyo dalka.
3. In uu ixtiraamo, kuna dhaqmo dastuurka iyo xeerarka kale ee Dalka.
4. In uu bixiyo cashuuraha ku waajibay si waafaqsan xeerarka khuseeya ee Dalka
5. In uu ku dhaqmo shuruudaha kale ee loo dejiyo deganaanshaha rasmiga.

## Qodobka 7aad

## Waxyaabaha ka-reebban qofka la siiyo deganaanshaha

Iyada oo laga duulayo qodobka 8aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, qofka ajaanibka ah ee la siiyo deganaansho rasmiga ah waxa ka reebban;

1. ka qayb-galka hawlaha siyaasadeed ee xisbiyada iyo ololayaasha doorashooyinka.
2. Taageeridda iyo Gacan-siinta urur ama xisbi siyaasadeed, musharax ama musharaxiin doorasho siyaasadeed.
3. In aan la dooran Karin, waxna aanu dooran Karin.
4. ka-mid noqoshada Hay'addaha amniga.

## Qodobka 8[aad]

## Kaadhka Deganaanshaha Rasmiga (permanent Residence)

1. Qofkasta oo loo ogolaado in la siiyo deganaanshaha rasmiga ah waxa la siinayaa kaadhka aqoonsiga deganaanshaha rasmiga ah.
2. Kaadhka aqoonsiga deganaanshuhu waxa uu ka samaysnaan doonaa shay aan si fudud u tirtirmayn ama dhammaanayn oo aan wax laga beddeli karayn ama la-been abuuri kareyn, lana bedeli Karin oo laf ah.

## Qodobka 9[aad]

## Xogta Kaadhka Deganaanshaha Rasmiga ah

1) Xogta lagu qorayo kaadhka deganaanshaha rasmiga ah wax ka mid ah; Magaca qofka oo afaran.
2) Sawirka qofka
3) Jinsiga (Lab ama Dhedig)
4) Da'da.
5) Taariikhda dhalashada.
6) Goobta dhalashada.
7) Lambarka aqoonsiga deganaanshaha.

8) Taariikhda la-bixiyay

9) Taariikhda uu dhacayo.

## Qodobka 10[aad]

## Diiwaanka Deganaanshaha

1) Laanta Socodaalku waa in ay abuurtaa diiwaanka deganaanshaha oo lagu diiwaan-gelin doono qof kasta oo la siiyay ogolaanshaha deganaanshaha rasmiga ah.

2) diwaanka deganaanshuhu waa hanti dawladeed, loogamana faaiidaysan karo sifo aan sharciga waafaqsanayn.

3) xogta deganaanshaha ee qofka ajaanibka ah waxa lasiin karaa hay'adaha nabada-galyada, haddii ay lagama-maarmaan u tahay amniga iyo nabad-gelayada guud ee qaranka iyo muwaadiniinta, waxaana lagu bixin karaa oo kaliya haddii uu sharciga sidaas waajibiyo ama amar ay soo saartay Maxkamad awood u lihi.

## Qodobka 11[aad]

## Xogta Diiwaanka

1) Diiwaanka dadka ajaanibka ah waxa uu noqonayaa mid casri ah (Electronic), Waxaana qofka laga qaadayaa sawirka wajiga, faraha iyo indhaha (Biometric Data)

2) Diiwaanka deganaanshaha qofka ajaanibka ah waxa lagu qorayaa ugu yaraan xogta hoose ku xusan:

    1. Magaca qofka ajaanibka ah oo afran.

    2. Lab ama dhedig.

    3. Sanadka uu dhashay.

    4. Halka uu ku dhashay.

5. Magaca Hooyada oo saddexan.
6. Jinsiyada qofka ajaanibka ah.
7. ciwaanka qof ajaanibka ah
8. Xaaladda Guurka, Xaas iyo doob.
9. Lambarka gaarka ah ee lagu diiwaan-geliyay, iwm

## Qodobka 12aad

## Bixinta Deganaanshaha Rasmiga ah

1) wasaaradda Arimaha Gudaha ayaa u xil-saaran maamulka, bixinta, iyo sugidda qofka ajaanibka ah ee la siinayo kaadhka deganaanshaha rasmiga ah, waxaana uga wakiil ah laanta socdaalka, sida ku xusan Qodobka 1aad iyo Qodobka 5aad ee xeerka laanta socdaalka.

## Qodobka 13aad

## Cashuurta Deganaanshaha Rasmiga ah

1) wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxay soo saaraysaa cashuurta deganaanshaha rasmiga ah, iyada oo kala tashanaysa saraakiisha laanta socdaalka.

## Qodobka 14aad

## Kala-noqoshada iyo Burinta Deganaanshaha Rasmiga ah

Deganaanshaha Rasmiga ah waxa lagala noqon karaa qofka ajaanibka ah ee la siiyey qodobbadan;

1) haddii uu galo danbi ciqaabtiisu thay shan sanno (5 sanno) iyo wixii ka badan.

2) haddii uu dalka ka maqnaado (3 sanno) saddex sanno iyo wixii ka badan oo xidhiidh ah.

3) haddii uu iskii uga tanaasulo deganaanshaha rasmiga ah.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

---

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-895/072022 Taar: 02/07/2022

## Wareegto Madaxweyne
## Cafis

| | |
|---|---|
| Markaan Arkay: | Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad, Farqaddiisa 5aad; |
| Markaan Tix-galiyey: | Codsiga odayaasha iyo Wax-garadka; |
| Markaan Arkay: | Soo-jeedinta Cafiska Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka; |
| Markaan La-tashaday: | Hay'adaha ay Khusayso; |

**Waxaan Go'aamiyey;**

In laga bilaabo taariikhda maanta aan cafis u fidiyo Maxamed Cabdi Sheekh Maxamuud iyo Cabdijibaar Maxamed Xuseen.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-900/072022 Taar: 07/07/2022

## Wareegto Madaxweyne

### Cafis

| | |
|---|---|
| Markaan Arkay: | Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90[aad], Farqaddiisa 5[aad]; |
| Markaan Arkay: | Qoraalka Taliska Guud ee Ciidanka Asluubta ee sumaddeedu tahay TCA/G-1/149/2022, ujeeddadiisuna tahay Soo-gudbin liiska Maxaabiista Cafiska galaya Sanadkan 2022-ka; |
| Markaan Arkay: | Qoraalka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee summaddeedu tahay XIG/JSL/436/2022, kuna taariikhaysan 06/07/2022 u jeeddadiisuna tahay soo jeedin cafis guud; |
| Markaan La-tashaday: | Hay'adaha ay Khusayso; |

**<u>Waxaan Go'aansaday;</u>**

In laga bilaabo taariikhda maanta aan cafis guud u fidiyo maxaabiista denbiyada fudud ku xukuman ee xabsiyada dalka ku xidhan, munaasibadda Ciidul Adxa awgeed, oo tiradoodu dhantahay 546 (Shanboqol iyo Lix iyo Afartan) maxbuus. Cafiskani saamayn kuma laha xuquuqda madaniga ah iyo raadka ciqaabeed ee ka dhalanaya danbiyada ay ku xukunnaayeen. Waxa cafiskan fulinaya Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, iyada oo la raacayo liiska Maxaabiista ee halkan ku lifaaqan.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

---

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-922/082022 Taar: 15/08/2022

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waaya-aragnimadiisa;

| | |
|---|---|
| Markaan ku Qancay: | In uu Hanan karo masuuliyadda ka dhalanaysa Xilkan; |
| Markaan Sameeyey: | La-tashi; |

<u>**Waxaan Go'aamiyey;**</u>

In Jaamac Maxamuud Warsame laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Sanaag ee Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

---

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-924/082022 Taar: 15/08/2022

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

| | |
|---|---|
| Markaan Arkay: | Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad; |

| | |
|---|---|
| Markaan Arkay: | Aqoontooda, Kartidooda iyo Waaya-aragnimadooda; |
| Markaan ku Qancay: | In ay Hanan karaan masuuliyadda ka dhalanaysa Xilalkan; |
| Markaan Sameeyey: | La-tashi; |

**<u>Waxaan Go'aamiyey;</u>**

In laga bilaabo taariikhda maanta aan masuuliyiintan u magacaabo xilalkan:

| Tir | Magaca | Xilka |
|---|---|---|
| 1. | Ismaaciil Saleebaan Bookax | Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caddaalada |
| 2. | Axmed Xasan Aw Aadan | Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqo-gelinta, arrimaha Bulshada iyo qoyska |
| 3. | Maxamuud Aadan Yuusuf | Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyeynta |
| 4. | Cabdirashiid Ibraahin Sh. Cabdiraxmaan | Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska |
| 5. | Axmed Cabdirisaaq Diiriye | Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gaashaan-dhigga |
| 6. | Maxamed Cabdillaahi Cabdiraxmaan (Caynab) | Agaasimaha Guud ee Guddida Qandaraasyada Qaranka |

| | | |
|---|---|---|
| **7.** | Maxamed Xaaji Yaasiin Siciid | Agaasimaha Wacyi-gelinta iyo Abaabulka ee komishanka HIV/AIDS-ka |

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

______________________________________________

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-936/092022 Taar: 13/09/2022

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waaya-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan karo masuuliyadda ka dhalanaysa Xilkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

## <u>Waxaan Go'aamiyey;</u>

In Maxamed Cabdillaahi Ducaale Cajab laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Deegaanka iyo Is-beddelka Cimillada Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-937/092022 Taar: 13/09/2022

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

| | |
|---|---|
| Markaan Arkay: | Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad; |
| Markaan Arkay: | Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waaya-aragnimadiisa; |
| Markaan ku Qancay: | In uu Hanan karo masuuliyadda ka dhalanaysa Xilkan; |
| Markaan Sameeyey: | La-tashi; |

<u>**Waxaan Go'aamiyey;**</u>

In Cabdikariim Aadan Siciid laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyi-gelinta Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

---

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222/938/092022 Taar: 13/09/2022

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

| | |
|---|---|
| Markaan Arkay: | Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad; |
| Markaan Arkay: | Aqoontiisa, kartidiisa iyo waaya-aragnimadiisa; |
| Markaan ku Qancay: | In uu Hanan Karo masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan; |
| Markaan Sameeyey: | La-tashi; |

<u>**Waxaan Go'aansadey;**</u>

In Siciid Axmed Cabdikariim Maxamuud laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

---

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222/939/092022 Taar: 13/09/2022

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

| | |
|---|---|
| Markaan Arkay: | Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad; |
| Markaan Arkay: | Aqoontiisa, kartidiisa iyo waaya-aragnimadiisa; |
| Markaan ku Qancay: | In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan; |
| Markaan Sameeyey: | La-tashi; |

**<u>Waxaan Go'aansadey;</u>**

In Maxamed Yuusuf Ismaaciil Cabdi laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

---

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222/940/092022 Taar: 13/09/2022

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

| | |
|---|---|
| Markaan Arkay: | Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad; |
| Markaan Arkay: | Aqoontiisa, kartidiisa iyo waaya-aragnimadiisa; |
| Markaan ku Qancay: | In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan; |
| Markaan Sameeyey: | La-tashi; |

**<u>Waxaan Go'aansadey;</u>**

In Mustafe Maxamed Cawil Diiriye laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Xubin ka tirsan Guddida Hay'adda Shaqaalaha Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

---

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222/942/092022 Taar: 09/24/2022

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

| | |
|---|---|
| Markaan Arkay: | Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad; |
| Markaan Arkay: | Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa; |
| Markaan ku Qancay: | In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan; |
| Markaan Sameeyey: | La-tashi; |

## <u>Waxaan Go'aansadey;</u>

In Mudane, Nasir Caydiid Maxamed Faarax laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

---

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222/943/092022 Taar: 27/09/2022

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

| | |
|---|---|
| Markaan Arkay: | Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad; |
| Markaan Arkay: | Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waaya-aragnimadiisa; |
| Markaan ku Qancay: | In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan; |
| Markaan Sameeyey: | La-tashi; |

**<u>Waxaan Go'aansaday;</u>**

In Guuleed Cabdi Xasan laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Xubin ka tirsan Guddida Qandaraasyada Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**